# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:22 AM** **Hansard No.24/2** **Kal-fadhiga 24aad**

**Fadhiyadii 12aad iyo 13aad** ***31/05-01/06/2014***

## Dooda Xeerka Xabsiyada oo socotey 2 maalmood ayna ka qeyb-qaateen 7 Mudane

1. **Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe):-** inta aan akhriyay anigu xeerku wuxuu u eegyahey in si aad u wanaagsan looga soo shaqeeyay oo dad aqoon iyo khibrad iyo aqoon u leh ay ka soo shaqeeyeen dhowr arrimood uun baa u baahan in wax lagu daro, sida dadka xabsiga dheer ku xukuman sida kuwa wax diley oo kale meesha lagu xidhayo waa in xeerka lagu daro iyadoo aan meel gooni lagu xidheyn oo la isla xidho ama maxaabiis kale lala xidho.

   **Qodobka 13aad** oo gudidu ka saartey farqadaha 2aad, 3aad iyo 4aad waxaan odha lahaa ha loo daayo xeerka farqadahaana, ugu dambeyn waxaan soo jeedinayaa anigu Xeerkan sidaa ha lagu ansixiyo uu xukuumada kaga yimi oo ha loo gudbiyo,

2. **Md. C/raxmaan Muuse Jaamac:-** Shir-gudoonka, Xogheynta iyo Golaha waan wada salaamayaa, intaa ka dib, Xeerka anigu inyar baan ka eegay waa Xeer aad iyo aad u fiican Gudiduna Qodobada qaar aan Xeerka ku jirin ayay ku soo dareen oo ah in Maxbuuska marka la soo galiyo Jeelka lala tago Xafiiska oo loo sheego nidaamka laga dhaqmo jeelka iyo nidaamka u yaala taas aad bay u fiican tahey, markaa inkastoo aan fahmi waayay ay leeyihiin Qodobada 14aad ilaa 20aad waxaanu u rarney meel hebla anigu maan fahmin.

   **Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa:-**

   - Xeerka sidii Xukuumadu ku soo Gudbisey baa dhameystiran oo aad iyo aad u fiican sidaas ha loo daayo oo halagu ansixiyo.

3. **Md. Faarax Maxamuud Cabdule:-** Mudanayaal Xeerkani waa Xeer aad u wanaagsan laakiin wuxuu koley u baahanyahey in la isku habeeyo,

   **Qodobka 4aad** waxaa ku qoran dabaqaada Xeerka wuxuu la macno yahaey **Qodobka 3aad** ee Ujeedada Xeerka iyo Dabaqaadiisa Markaa waa labada qodob oo isku mid ah

markaa **Qodobka 3aad** baa faahfaahsan sax ah ee isaguun ha la qaato, markaa qodobka 4aad

**Qodobka 6aad** waxaan ku soo kordhiyay Farqad kale oo **(J) dadka xiskoodu lumey ee loo waayay wax daawo ah ehelkoodu way heyn karaan meel ku haboon oo uu amaankiisa damaanad qaadayo Wuu ku heysan karaa.**

**Qodobka 7aad farqadiisa 3aad** waxaan ku sii daba darey dhamaadkeeda **(oo aan ka hor imaneyn Xeerkan Xabsiyada)** isla Qodobkaa **F/5aad waxaa halkaa ka maqan oo aan ku darey** (Taliska Ciidanka Asluubta)

**Qodobka 10aad F/1aad** halka u dambeysa ee ah **(waxaa ogolaanaya Wasiirka)** waxaan ka horeysiiyay oo ka dhigey ***(waxaa soo jeedinaya Taliyaha Ciidanka Asluubta waxaana ogolaanaya Wasiirka)*** marka waxaa ka maqnaa halka soojeedinta Taliyaha Ciidanka Asluubta oo marka taliyuhu soo jeediyo ayuu wasiirka Cadaaladu ogolaanayaa.

**Qodobka 11aad F/3aad** wuxuu yidhi Taliyaha ayaa ogolaanaya, markaa Waxa weeye ***Taliyaha Guud ee Ciidanka Asluubta***

**Qodobka 12aad** ee ujeedada Xabsiyada Gaar ah halkaa waxaa maqan (Sharciga) oo waxay noqoneysaa Taliyuhu isagoo raacaya Sharciga, markaa Kalmadaas ayaan ku darey Qodobkaasna.

Qodobka 13aad F/1aad *Taliyuhu wuxuu masuul ka yahey iney Xabsigu si fiican u shaqeeyaan iyadoo Masuuliyadiisa ay ka mid tahey Xabsi ku heynta, daryeelida, waxbarida iyo sugid amaan xabsiyada iyo Maxaabiista waxaanu sida ugu dhakhso badan ula socodiisanayaa Wasiirka*, Markaa waxaan halkaa ku si darey ***iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaran.***

**F/3aad** waxaan ka saarey si kasta oo ay ula muuqato oo aan iyadu meesha ku jirin in si kasta uu ka yeeli karo, Markaa waxaan ka dhigay ***(Taliyaha waxaa u banana inuu la tashado Wasiirka Cadaalada si u adeegsado kaalmada qofkasta ama ururkasta oo samo-fal)*** Markaa in sidaa loo dhigo ayay aniga ila tahey oo laga saaro inuu ula macaamilo si kasta oo ay ula muuqato.

**F/5aad** gabi ahaanba farqadaa waxa loola jeedo macnaheeda lama fahmayo markaa waan ka saarey Farqadaa anigu Xeerka

**F/6aad** waxaa ku qoran markey iskuu ula muuqato markaa waxaan ka dhigay oo ku haboon farqadaa ***(Taliyuhu wuxuu Qoraal ku magacaabi karaa sarkaal ku haboon arrimo dhacey baadhistooda)***

**Qodobka 16aad F/3aad** waxay sheegeysaa in taliyaha Xabsiga ka masuul yahey baxsasho kasta oo ku kaco maxbuus**,** hadii maxbuus baxsado taliyuhu masuul ha ka

ahaado laakiin masuuliyada waxaa qaadaya xubnaha Ciidanka ee Maxbuuskaa gacanta ku haya ayaa masuuliyadaa qaadaya markaa in sidaa laga dhigo ayaan soo jeedinayaa oo aan Masuuliyada Taliyaha lawada saarin.

**Qodobka 17aad F/2aad** halka ugu dambeysa ee laga dhigey amarka Wasiirka waxaan ku badali lahaa ***Taliye Xabsi***

**Qodobka 18aad F/2aad** Gabi ahaan farqadaasi wuu isku walaaqan yahey ma faahfaahsana waxa loola jeedo iyo Macnaheeda markaa waxaan soo jeedinayaa Meesha halaga saaro.

**Qodobka 20aad F/9aad Xarafka (T)** *"marka taliyaha Xabsigu xaqiijiyo sarkaal xabsi ama xubinta ciidan ee masuul ka ah dhibaatada dhacdey waxaa uu maxbuusku ku magdhabayaa khasaaraha gaadhey alaabtiisa wuxuuna si tartiiba uga jarayaa musharkiisa"* waxaan ka saarey farqadaa kalmada **(si tartiiba**) waayo ma cada, waa in la cadeeyo in Mushaharka laga jarayo waayo waa qaan maaha in la yidhaahdo si tartiiba ayaa looga jaryaa.

**Qodobka 21aad F/2aad** halkaa waxaan ku badalayaa **"wuxuu qori karaa Saraakiil tababaran oo aqoon waxbarasho u leh xirfadaha iyo aqoonta looga baahanyahaye Xabsiyada"** markaa halkaa shaqaalaha rayidka ee xabsiyada la geynayo inta laga daayo laga dhigaa saraakiil tababaran oo aqoontii leh in loo tababaro arrintaa Xabsiyada iley waa ciidane.

**Qodobka 24aad** halka taliyaha Xabsigu wuxu xafidayaa joornaalada, anigu **(Joornaalada)** waan ka saarey oo waxaan ka dhigey **(qoraalada)**.

**Qodobka 26aad F/3aad** farqadaa waxaan ku sii dabo-darey ***(wuxuuna u gudbinayaa Taliyaha Guud ee Ciidanka Asluubta)*** buug kaliya in lagu qor maahee waa in Wixii Xeer-ilaaliyuhu soo arkey u gudbiyaa dhaliilaha jira iyo wixii uu soo arkey Taliyaha Guud ee Ciidanka Asluubta buugana uu ku qoro, waayo dee Buuga taliyaha Xabsigu wuuba iska tuuri karaa.

**F/4aad** halkaa **Taliyaha Xabsiga** waxaan ku badaley **Taliyaha Guud ee Ciidanka Asluubta** waayo iley waa anigu farqada hore ku idhi waa in Xeer-ilaaliyuhu u gudbiyaa Taliyaha Guude.

**Qodobka 27aad F/1aad, 2aad iyo 3aad** waxaan kalmada **Xukun Jideeye** oo ku badan mar hadii ay tahey go'aan maxkamad ka soo baxay markaa ereygaa xukun jideeye waa in lagu badalaa **(Go'aan)** oo noqoneysa xukunka go'aanka Maxkamada.

**Qodobka 28aad F/3aad ereyga (galbis)** ha laga saaro waayo inagu kalmada galbis waxbeynu u naqaan markaa inta galbis laga saaro halaga dhigo **"waxaa la raacinayaa Ilaalo ku haboon oo ah marba intii loo baahdo"** ayaan ku badalayaa halkaa ay ku qoran tahey kalmada **"Galbis"**

**Qodobka 31aad** halkaa waxbaa ka dhiman ayaan isleeyahay**,** waxaan ku sii darey farqadaa dhamaadkeeda "***isagoo ogsiin qoraal ah u gudbinaya xeer-ilaaliyaha iyo maxkamadii qoraalka xukunku uga yimi"***

**Qodobka 33aad** qodobkani wuxuu ka hadlayaa xadhig dhimis, markaa sii akhriyay wuxuu sheegayaa dadka jeelka akhlaaq wanaagsan kaga dhaqma iyo iney muteysan karaan xadhig dhimis, anigu waxaan leeyahey Xadhigaasi meesha kuma jiro, xadhig dhimistu waxay ku iman kartaa saamaxaad loo fidiyo iyadoo qofka la saamaxayo aanu aheyn qof dadka dambiyo ka galey ama dalka, markaa sharcigu waa inuu aad ukala habeeyo qofka yeelanaya xabsi dhimis iyo kuwa kale, kuma kala cada, Markaa waxaan soo jeedinayaa waa in qodobkaa la faah-faahiyaa oo lakala cadeeyaa.

**Qodobka 34aad** wuxuu leeyahay siideynta shuruudeysan, sida loo qorey qodobkaasina ma habeysna markaa waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa siideynta shuruudeysan meesha laga saaro, waayo waa in la sheego qofka waxa xabsiga lagaga saarey.

**Qodobka 35aad** qodobka 144aad ee xeerka Ciqaabta guud ee la sheegayo waa in meesha lagu qoro oo lagu sheego.

**Qodobka 36aad F/1aad** waxaan u darey farqadan "**si waafaqsan Sharciga"**

**Qodobka 37aad F/3aad** halkaa waxay ku haboon tahey ileyn in sarkaalka ka warbixinayaa noqdo sarkaal gacanta ku haya xabsiga dhexdiisa uu noqdo qofka warbixinta la siinayaana noqdo taliyaha Xabsiga xukuma, waayo Taliyaha Guud ma siin karo tusaale ahaan sarkaalka Ceergaabo jooga xabsigeeda warbixinta ma siin karo Taliyaha Guud ee Ciidanka asluublta oo lama joogo.

**Qodobka 38aad F/3aad** qodobkaasi wuxuu ka hadlayaa gaar u xidhida maxbuuska, Markaa anigu halkaa waxaan idhi **"maxbuuska gaar loo xidhayo waa inuu helo waxyaabaha kale ee xeerka Xabsiyada uu cadeeyay ee Maxbuusyada kale ee xidhan helayaan"**

**Qodobka 41aad F/2aad** anigu waxaan halkaa ku badaley **"hadii aan xeer-ilaaliyaha guud ama ku-xigeenku aanu sabab baadhiseed u joojin aaska marxuumka dhintey waxaa aasaya Ciidanka gacanta hadii aaney sidaa codsan eheladiisu"** waayo xaguu ka gaadhayaa askariga ku dhinta ceergaabo ehelkiisuna joogo Hargeysa, markaa hadey yidhaahdaan anaga aasaaneyna waa loo fulinayaa, hadii ay yidhaahdaan ha la aasano dee waa la aasayaa.

**Qodobka 42aad** waxaan ku darey farqad cusub oo 9aad oo odhaneysa **"qof masuula oo aanu sharcigu u ogoleyn in la baadho waxaa la weydiinayaa sharcigiisa si loo aqoonsado, hadii sharcigi la waayo waa la baadhayaa"** waayo farqadaha hore waxay sheegayaan in qofkasta la baadhayo, dastuurkuna wuxuu siiyay inaan la baadhikarin

masuuliyiinta sida kuwa golayaasha ee wasiirada iyo Xildhibaanada, marka si aan sharciga loo jabin waa ayaan farqadan ugu darey in Qodobkaas.

**Qodobka 44aad** waxaan ku darey **Farqad 4aad** oo cusub oo sheegeysa qofka la qabtey marka la helo cadeyntiisa inaanu dhibaato wadin in la sii daayo markaa waxaan ku darey "qofka la qabtey marka la helo cadeyntiisa waa la sii deynayaa

**Qodobka 45aad F/1aad Xarafka (s)** halka ugu dambeysa waxaan ku sii darey **"waxaa laga qaadayaa talaabo anshax-marineed"** waa dadka xabsiyada dambiga fudud ka gala, markaa mar hadii aan maxkamad iyo aan loo gudbineyn dee anshax-marin uun wax laga qaado, sidaa darted waa iney ku cadaataa talaabada laga qaadi karaa, waxaana ka dhigey sidaa anshax-marin in laga qaadayo.

**Qodobka 52aad F/10aad** *"waxaan u badaley farqadaa in warbixinta Gudiddu u gudbineyso Taliyaha Guud"* waxaana ka dhigey **"waxay Gudiddu u gudbineysaa Warbixinta Wasiirka"** markaa halkii taliyaha Guud ayaan ku badaley Wasiirka.

**Qodobka 53aad** waxaan ku darey Farqad cusub oo noqoneysa **F/4aad** iyadoo Qodobku ka hadlayo Kormeerka farqadaas "***Gudiyada Golayaashu waxay xaq u leeyihiin iney kormeeraan xabsiyada iyo jeelasha iyagoo wixii dhaliilaha qoraal ahaan ugudbinaya Golaha ay ka tirsanyihiin ee baarlamaanka iyadoo Goluhuna qoraal ahaan ugu gudbinayo Wasiirka Cadaalada iyo Taliyaha Ciidanka Asluubta"***

**Qodobka 56aad** halkaa waxaan ka saarey "**Xilli macquul ama goorta uu ogolaado taliayaha xabsigu**" waxaana ku badaley **"xilliga Saacada shaqada"** waayo qareenku soo guureyn mayo waa inuu xilliga saacadaha shaqada uu yimaado qofka oo uu ku wareysto.

**Qodobka 57aad** waxaan ku sii darey halkaa **"in dhakhtar la geeyo maxbuuska ku haboon"** sidoo kale **Qodobka 59aad** oo ka hadlaya isna soo booqashada maxbuuska waxaan ka saaey kalmada ah **"xalaal ah"**

**Qodobka 80aad F/1aad** halkaa waxaan ku sii darey farqadaa dhamaadkeeda **"inta uu ka helay talada dhakhtarka" Qodobka 84aad** anigu waxaan leeyahay Qodobkaa yaan sidaa lagu xalaaleynin guud ahaanba ha laga saaro xeerka waayo baxsi aan cid lagu eedeyn Karin waa inuu meesha ka baxaa, markaa in laga saaro xeerka ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 87aad F/2aad** halka ugu dambeysa ee ah lix bilood xadhig waxaan ku darey **"ugu yaraan Lix bilood"** waxaana ku sii darey **"ama labadaba"**

**Qodobka 93aad F/3aad** farqadaa anigu waan garan waayay arrimahaa gaarka ah ama xaaladaa gaarka ah, markaa farqadaa waxaan soo jeedinayaa in laga saaro, waayo

waynu soo sheegney awooda inuu wasiirka siin karo warbixino, markaa wuxu hadaaney cadeyn waa in laga saaro**.**

**Qodobka 97[aad]** ee dhaqangalka Xeerka, sida uu qoran yahey waxay khilaafsan tahey sideynu u qori jirney dhaqan galka xeerka, markaa waa in laga dhigo sidii hore oo ah **"Xeerku wuxuu dhaqan-galayaa marka labada Gole ansixiyaan Madaxweynuhu Saxiixo"** sidaas ayaa lagu qoraaye. Intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa.

4. **Md: Axmed Barkhad Obsiiye:-** Shirgudoonka xildhibaanada iyo shaqaalahaba waan salmayaa salaam kadib xeerkani waa xeer loo baahanaa oo muhiim ah inkasta oo anan sida Faarax u akhriyin hadana waan eeg eegay waxaa kala duwacan sida ay gudidu u dhigtay iyo sida uu xeerku u yaalo oo kala gadisan sida qodobo meel laga soo wareejinayo oo meel kalana lagu darayo kii wii halkaa laga soo wareejiayayna aan la sheegin meesha lagu wareejiyay waxyaabo sidaa ah ayaan ku arkay markaa woxogaa jaha wareera ayay keenaysaa.

   Waxaa kale oo ka maqan xeerka oo aan ku darayaa ***nadaafada Jeelasha*** nadaafadooda waayo waa mihiim in la ilaaliyo nadaafadooda sobabta oo ad dad ayaa ku nool mana haboona in ay qaadaan xanuuno ee waa in caafimaad kooda la dhawro, waxaa kale oo haboon in markay maxaabiistu ay ka soo baxayso jeelka in ay ka soo baxaan iyaga oo tababaran xirfadna leh oo uu is dabari karo marka uu soo boxo

   **Ugu dambeyntii:-**

   - Anigu waxaan leeyahay xeerkan si dhakhso ah haloo ansixiyo sidaa uu yahay ee xukuumadu u soo gudbiseyna halagu ansiyo.

5. **Md. Cabdiraxman Yuusuf Cartan:-** Waxaan la qabaa xildhibaanka iga horeeyay hada tan ay gudidu soo qortay ee ah Qodobada la kala wareejiyay oo aan la sheegin meelaha loo kala wareejiyay oo waa lagu jaha wareeyaa, gididu mana ay sobobay siyaabaha ay u kala wareejiyeen waxaana haboonaa in xeerkan iyo kii hore la isla qaybiyo si la iskula eego, markaa waxaa haboon mar hadaan nuxurkii is badalayn in sidii hore ee loogaga soo shaqeeyay loo daayo.

   Waxaa kale oo aan intaa ku darayaa xeerkan dhab ahaantii waxaa ka soo shaqeeyay dad aad iyo aad Khibrad u leh afsoomali wanaagsana waa lagu soo

qoray wakhti iyo dadaal badana la qaliyay Markaa waxaan soo Jeedin lahaa in soo gudbinta Gudiddu aanay ku fadhiyin asbaab dhaba oo waajibinaysa in qodob iyo qayb laga soo wareejiyo meelo oo loo wareejiyo meel anigu waxaan ku talin lahaa maadaama ay dadka xeerka ka soo shaqeeyay ay yihiin dad khibrad u leh in sidii sii hore ay gudiddu u dayso ina mar hadii aynu nahay Wakiiladii in wixii nuxur ah aan xooga saarno.

Anigu Qodob kalena waan tilmaamayaa marka badiyaaba xeerarka la qorayo waxaa lagu soo gudbiyaa xeerar inagu soo socdaana waa jirayaane waajibaabka Wasiirka iyo Wasaaradda waxaad moodaa dadkii xeerka soo diyaariyay in ayna qodobkaa qorin ee ay tahay mid ay ku soo darsadaan xukuumadu ama wasaaradu in badana waxay candadawshaa ilayn waa wax dibada laga keenee majarihii xeerka ama waxaa ay keentaa awoodo dheeraada ama xilal sida shaqo taliyuhu lahaa oo wasiirka u wareegay ama taliyaha oo warbixino qaldan loo gudbiyo wasiirka, oo aad moodo in marwalba wasiirku wado banaysanayo oo aanay cadayn Wasaarada Cadaalada Waaxda Qaabilsan Xabsiyada ayaa report ka la siinayaa ee la odhanayo wasiirkaa la siinayaa markaa waa in ay wasiirka iyo wasaaradu kala Jaad noqdaan.

Sida aan hore u sheegay waa xeer aad looga soo shaqeeyay waxaanu u qoran yahay si casriyaysan oo aad moodo in uu hababka casriga ah la jaan qaadayo, wanan halkan ku qoran xeerka waxaa lala maamulayaa xeerka xaquuqda caalamiga ah ee Qaramada midoobay iyo Xuquuqal Insaanka markaa waa in ay lifaaq ahaan ugu xidhnaataa xeerarka la leeyahay waa lala akhriyayaaa

Markaa waxaan soo jeedin lahaa in Gudidda iyo Goluhuba arinkaa isla eegaan ayna lifaaq ahaan u soo raaciyaan

Waxyaabaha kale ee aan tilamaamayaa waa farsamo ahaan Qaybta 3aad ee Maamulka Xabsiyada Qodobk 2$^{aad}$ waxaa ku qoran taliyaha waxa kale ee uu hubinayaa in sida ugu dhakhsaha badan uu taliyuhu ku war galiyo geeri kasta oo maxbuus faldanbiyeed kasta oo laga galay sida ugu dhakhsaha badan. Markaa waxaan odhan lahaa waa in la mudeeyaa halkaa, ma 48, 24, 12 saacadoodbaa, waa in wakhti cayimani ku qoran yahay.

Dhanka kale waxay muskiladu tahay eray bixinta waxaa ku qoran Taliyaha waxaa loola jeedaa jananka xukuma ciidanka asluubta, waxaa iyana qoran Taliyaha Xabsiga markaa waxaa jirta in lakala reebo mararka qaar taliyaha iyo xabsiga ayaa dhacda in la kala reebo markaa waa in aan la kala reebin ee la

yidhaa taliyaha xabsiga waayo waxay isku khaldamayaa taliyihii weynaa ee janaka.

Isla **Qodobkaa 13aad f/7aad** waxaa ku qoran soo warbixiyuhu waxaana loola jeedaa in la yidhaa reporter afsoomaali ahaana ma quruxbadna reporter iyada oo loola jeedo in la meel mariyo baadhista lagu jideeyay Qodobka soo warbixiyuhu waxa uu ka dalbi karaa sarkaal kasta oo xabsi xubin ciidan kasta ama maxbuus kasta in uu ku soo wareejiyo documenti kasta oo uu doono.

Qodobka 14 aad farqadiisa 2aad waxaa ku qoran amarada Joogtada ah ee taliyuhu ku bixiyo si waafaqsan farqadaha markaa amarada joogtada ahi afsoomili maaha wax salaga is ticmaalo malaha xabsiga ama laga soo tujumay af ajanabi oo aan la siin turjumaadii saxda ahayd, taliye ku xigeenka cida maqacaabaysaa ma cada halka taliyaha uu magacaabayo Madaxweynuhu.

**Qaybta 4aad** Haynta wareejinta iyo siidaynta Masbuura **f/1aad** waxaa ku qoran marka laga reebo maxbuur salaga soo wareejiyay dal shisheeye si waafaqsan xeerka wareejinta maxaabiista waxaa xabsiga lagu soo celin karaa amar Gasoore ama xadhig jodeeye ka soo baxay maxkamada.

Markaa waxaan garan waayay xadhig jideeyaha miyaanu garsoorku soo qorayn ma waxaa soo qori kara karaaniga ama kaaliyaha, hadii uu kaaliyuhu soo qoro sax ayay noqonaysaa oo maxkamadii isagaa ka wakiila, lakiin xadhig jideeyuhu waa kalmad igu cusub aniga.

**F/3aad** waxaa ku qoran maxbuus kasta oo xukumane ah waxaa xukun jideeyihiisa wehelinaaya sawir kur ah oo loosoo raacinayo sida xeer nidaamiyaha lagu faafinayo, taa waxaan ka fikiraynaa mustaqbaliyan ee maxkamadeheena iyo xabsiyadeena wax ka dhexeeya maahan lkn mar hadii aan xeer samaynayno waa muhiim dhaatada noocaas ahi ay dhex gooshaan xabsiyada iyo max kamadaheena,

**Qodobka 28aad f/2aad** waa tii aan sheegayay ee ahayd taliyaha iyo taliyaha xabsiga, halkaa waxaa ku qoran haynta iyo ilaalinta sharciga ee taliyaha xabsiga, hadana isla qodobkan waxaa ku qoran maxbuuskasta marka laha qaadayo ama lagu sii wado xabsi ama markasta oo uu ka shaqaynayo meel xabsiga ka baxsan ama xuduud ka baxsan xansiga ama hawl la ogolaaday waxaa loo aqoonsanayaa in uu ku jiro haynta sharciga ee taliyaha waxaa laga hadlayaana waa taliyaha xabsiga eray bixintana waxaa inoogu jirtay jananka asluubta markaa xabsigaa laga tagay ayaa badalaya macnaha.

**Qodobka 30aad** iyana waa sidaas oo kale markaa halka hore aanka saxno ee aray bixinta oo aan kala saarno taliyaha iyo taliyaha xabsiga oo ha la yidhaahdo taliyaha guud marka la sheegayo ka xabsigana taliyaha xabsiga waa in la kala sooco waayo xeerka qalad ayaa ka galaya halka,

**Qodobka 38aad** Gaar u xidhida Maxbuuska **f/1aad** si loo sugo kala danbaynta iyo amaanka xabsiga waxaa uu taliyuhu si qoraal ah ku amri karaa gaar u xidhida masxbuuska mudo aan ka badnayn 21 cisho anuu waxaan qabaa weybadan tahahay 21 casho qof dhisibiliin lagu xidhayaa markaa hadii aan la sheegin dabiyada lagu qaadao waayo si guud ayay u qoran tahay markaa halkaa wax halaga badalo waxanan odhanlaa ugu badnaan todobaad halaga dhigo (7 casho) yaan laga badin.

Halkan waxaa ku jira eray aad u cajiiba oo aan garan waayay **Qodonka 51aad** magacaabida gudidda kormeerka xabsiyada f/2aad waxaa ku qoran mudada xilka ee gudiyadu waa 1 ama 2 sano markaa dhinac ha loo daayo oo waliba waxaan soo jeedin lahaa haloo daayo 1 sano f/4aad waxaa ku qoran Eray aan fahmi waayay Wasiirku waxa kale oo uu amri karaa in gudidda kormeerka xabsiyadu kormeer aan la sii sheegin ay ku samayso xabsi ama xabsiyo gaara ama dib u eegis loogu samaynayo arimo alogaysan eraygaa waa in la saxaa mar hadii uu xeeryahay.

Qodobkii markii dhawayto aan sheegayay ee aan lahaa halagu daro waa **Qodobka 52aad F/7aad** waxaa ku qoran marka ay xilkeeda gudanayso Gudiddu waxay tix galinsiinayaa halbeeg aan hoos loo dhaafi Karin ee Qaramada Midoobay ee ladhaqanka Maxaabiista markaa waa in xeerkan lifaaq ahaan loogu soo xidhi waana mid aad u mihima in taliyayaasha iyo xidhibaanaduba ay la socdaan halbeegaa aan hoos loo dhaafi Karin, waxaa kale oo ku jira qolyo iyaguna kor meeraya sida xaquuqal insanka, gudidda wasiirku magacaabo ee baadhista, waxaa ay ila tahay in lagu daro gudidda cadaalada ee Golaha wakiilada iyo Guurtidda.

Xeerkani waa xeerasha ugu wanaagsan ee ina soo maray, Anigu waxaan odhan lahaa mar hadii aanay gudiddu sobabayn siyaabaha ay Qodabada u kala wareejiyeen sidii sii hore halugu daayo waayo waa xeer aad looga soo shaqeeya

tacab badana la galiyay waad mahad santihiin intaa ayaan ku soo gabagabayn lahaa.

6. **Md. Axmed Maxamed Nuur:-** Shigudoonka iyo mudanayaashaba waad salaamayntihiin, Xeerkan waxaa ka muuqda taliye ilaa taliya sida aan ka warqabno waxaa jira hogaano xeerkana waxaa uu si fiican u muuqan lahaa inaga oo hayna xeerka Qaab dhismeedka Ciidanka Asluubta kaana ma hayno taliyihii Xabsiga degmooyinka iyo Goboladuba isku xidhmi maayaan waana taliyaha iyo taliyihii guud uun waxa xeerkani sheegayo.

   Markaa hadii aan eegno **Qodobka 13[aad] farqada 4[aad]** waxay leedahay ***"Taliyuhu waxa uu sanadkiiba ugu yaraan booqanayaa oo kor meerayaa ama amrayaa booqashada iyo kormeerista dhamaan xabsiyada waxaanu natiijada kormeerka u gudbinayaa wasiirka"*** halkaa waxaan leeyahay sanadkiiba halmar ay tahay anuu waxaan ka dhigi lahaa oo ka qurux badan sanadkiiba 3 jeer ugu yaraan waayo waxaa ku jira xabsiyada dad xoriyadoodii laga qaaday oo u baahan daryeel caafimaan iyo hawlahooda gaarka ah, markaa waxaa loo bahan yahey inuu xog dhaba iyo xogogaal u yeesho waxay ku sugan yihiin. **(Secondment buu helay Qodobkaasi)**

   **Qodobka 39[aad] F/1[aad]** waxaa isweydiin leh taliyuhu markuu amro xubin ciidan ama sarkaan inay ilaaliyaan Maxbuus oo la yidhi sarkaalku wuxuu maxbuuska u isticmaalayaa hub fudud, horta waxa isweydiin leh maxbuuskan la ilaalinayaa halkuu ku xidhan yahey, xabsiyadeena waxaynu ognahey iney leeyihiin meelo loogu tallogaley, markaa maxbuuskan la leeyahey waa la toogan karaa halkuu ku sugan yahey waa iney cadaataa, ma mid dhaktar loo direy baa, ma mid gidaar la fiidhisiyay oo la yidhi ku ilaali baa, waxaa leeyahey ha lagu cadeyo meeshan lagu ilaalinayo Maxbuuskaas.

   **F/2[aad]** waxaan leeyahay farqadan lafteedu ma cada waayo hadii uu qof isku dayo in uu sifo sharci daro ah ku galo ama maxbuus xabsiga ka so furto hadii ay dhacdo waxaa danbigaa loo raacayaa cidka ka masuulka ahayd ee wakhtigaa ku qornayd Xabsiga ee salkaal ama ciidan aheyd, maxbuuskii la furanayay isaga waxba loo raaci mayo.

   **F/12[aad]** oo ah "**Sarkaalka Xabsi ama xubinta ciidan ee adeegsada Hubka qaabka sharciga ah ee la yimaada taxadirka loo baahan yahay loo raaci maayo Masuuliyad madani ah oo falkaasi ka timid"**Farqadaa iyana muhmal ayaa ku jira waayo waxani waa xeer Xeerashuna waxay ku fiican yihiin in la cadeeyo waayo waxay noqon kartaa askarigani cid ay hore isku hayeen

markaana uu si badheedha u dilo qofkan isago ka aarsanaya taasi markaa waa inay jirtaa cid amarka bixineysa waana in loo hayaa cadaymo badan oo markhaatiyo wata iyo in askariga wax toogtay uu cid amar ka haysto.

**Qodobka 40aad F/1aad** waxaan leeyahey horta Maxaabiis ooda soo goosatey dhibaatadeeda ayay leedahay, taliyaha xabsiga waxaa looga baahan yahey markiisa horeba in uu xidhiidh dhaw la yeeshaa maxaabiista qaar si uu u ogado dhaqdhaqaaqa ka socda meesha waayo waxaa laga kaaftoomi karaa iney ooda soo jabinta maxaabiista waayo in xaag lagu isticmaalaa ma haboona oo qaarna ku dhintaan qaarna ku dhaawacmaan.

**Qodobka 43aad F/4aad waxaan** leeyahay warbixin taliye la siiyaa dee ugu horeyn waa in la xidhaa cidii waxaan u gudbisey Maxaabiista sharcigana waa inuu u gudbiyaa taliyu markuu xidho, laakiin warbixin taliyaha la siiyo oo kaliya waxay ila tahay inaaney ku filneyn intaasi,

7. **Md. Siciid Warsame Ismaaciil:-** Marka hore waad Salaamantihiin Gudoomiye iyo Mudanayaal, waxaan doonayaa inaan wax ka idhaahdo ugu horeyn Wax ka badalka Gudida ee Xeerkan dhowr qodob ayay wax ka badaleen hadaan eego waxaa ka mid ah **Qodobka 1aad** ee Erey bixinta waxay ka saareen qaar sida MAXBUUS XABSI YARE ah anigu waxaan u arkaa Maxbuuska xabsi yare ah ee meesha ku jirey in loo daayo waayo waxaa ku jira Maxbuus Xabsi weynaha, markaa hadii kaasi ku jiro maxbuus yarahana ha loo daayo.

   Waxay kaloo ka saareen Gudi mihiim aheyd oo ah Gudidda Kormeerka Xabsiyada, Gudidaas oo aheyd mid madax banana shaqadoodiina ay meesha ka saareen, Guddidaasi waxay ku fiican tahey in loo daayo meesha oo aan la odhan taliyuhuun baa ceynkaas ah oo gudi madax banana oo shaqadoodu tahey inay xubiso xabsiyada iyo xuquuqda qofka maxbuuska ah, sidaa darted waxaan soo jeedinayaa in Guddiaasna Xeerka loo daayo oo lagu soo celiyo.

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
| --- | --- |
| Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI |
| ------------------------------------------------ | ----------------------------------------- |